

Ra'yigaaga ka dhiibo caymiska baabuurta

Abril 26, 2024 [Waydiimaha warbaahinta](#)

Dawladda Alberta waxay rabtaa inay ka dhagaysato dadka reer Alberta waxyaalaha ku saabsan sida looga dhigi karo caymiska baabuurta mid jaban oo aan isbaddal lahayn muddada fog.

Sicirka caymiska baabuurta ayaa Canada oo dhan kordhayay, iyadoo kharashka dayactirka, qaybaha isbeerka oo gabaabsi ah, xatooyada gaadiidka, iyo dhaawacyada qofka soo gaaraya iyo kharashka sharciga oo dhammaantood iyaguna qayb ka ah arrintan.

Dadka reer Alberta waxay u baahan yihiin nidaam caymis oo sahlan, jaban oo aan isbaddalayn kaasi oo iyaga iyo qoysaskooda ilaaliya markay baabuur wataan. Dawladdu waxay bilaabaysaa xog ururin ka qaybgalka dadwaynaha oo onlayn ah si ay u ururiso jawaabcelinta reer Alberta ee ku saabsan waxa qiimaha agtooda ka leh ee ay uga baahan yihiin caymiskooda baabuurta.

"Waxaanu ku hawlanayn inaanu la nimaadno xal waara oo loo helo arrinta culus ee sare u kicidda kharashka caymiska baabuurta. Inta aanu ku jirno kala-doorashada ikhtiyaarada na hor yaala ee horumarinta nidaamka, waxaanu u baahannahay inaanu maqalno fekerka iyo waayo-aragnimada reer Alberta. Jawaabcelintoodu waxay naga caawin doontaa doorashada dhabbaha saxda ah si loogu ilaaliyo caymiska baabuurta jabnaan iyo waaritaan."

Nate Horner, Madaxwaynaha Guddida Qasnajiga iyo Wasiirka Maaliyadda

"Qiimo jabnaantu waa waxa ugu wayn ee ka guuxaya maskaxda reer Alberta. Waxaanu u baahannahay inaanu samayno wax kasta oo keenaya inaanu ka caawino inuu jabo caymisku, waana taas sababta aanu u rabno inaanu ka qaybgalino doorashada ikhtiyaarka ugu fiican ee hoos loogu dhigi karo sicirka caymiska baabuurta."

Nathan Neudorf, Wasiirka Sicirka iyo Adeegyada

Dawladda Alberta waxay waydiisay khubaro madaxbannaan inay fiiriyaan nidaamyada lagu yarayn karo kharashka caymiska baabuurta laguna horumarin karo waaritaanka iyo degganaanta suuqa caymiska.

Oliver Wyman waxay shiishka ku saartay shaqadeeda isbarbardhigga celceliska khidmadaha nidaamyo caymiska baabuurta oo jira oo kala duwan, inta badan Kanada oo dhan. Nous Group waxay baareen kharashka iyo faa'idada

guud ee mooddooyinka caymisyadan baabuurta ee kala duwan. Wax go'aano ah lagama qaadan isbaddalada lagu samayn doono nidaamka caymiska baabuurta ee Alberta. Warbixinahan waxa loo isticmaali doonaa ka qaygalka iyo siyaasadaha mustaqbalka.

"Waxaynu ognahay haddii aan isbaddalo la samayn si wax looga qabto kharashka shilalka ee sii kordhaya, khidmadaha caymiska baabuurta uu sii kordhi doona. Waxaanu ku boorinaynaa dhammaan darawalada Alberta inay ka qaybqaataan xog ururinta ka qaybgalka dadwaynaha ee onlaynka ah si ay u wadaagaan aragtidooda ku saabsan waxa agtooda qiimaha ka leh ee ay ka filayaan caymiskooda baabuurta."

Jamie Hotte, guddoonka, Guddida Sicirka Caymiska Baabuurta

Dadka reer Alberta waxay ka akhrin karaan warbixinaha Oliver Wyman iyo Nous Group onlayn, iyo sidoo kale guudmarro kooban oo faham guud ka bixinaya xog ururinta.

Xaqiiqooyinka kooban

- Xogururintu waxay furnaan doontaa ilaa Arbacada, Juun 26, 2024.

Macluumaadka la xidhiidha

- [Dib-u-habaynta caymiska baabuurta](#)
- Warbixin: [Isbaddalada Caymiska Baabuurta Alberta](#) (waxa ka mid ah daraasadaha Oliver Wyman iyo Nous Group)
- [Ka qaybgalka caymiska baabuurta](#)

Wararka la xiriira

- [Darawalo wanaagsan si looga faa'ido isbaddalada caymiska baabuurta](#) (Noofambar 1, 2023)

Su'aalaha warbaahinta

[Justin Brattinga](#)

587-357-2956

Xoghayaha Saxaafadda, Guddiga Qasnajiga iyo Maaliyadda